



[UJEEDDO] Fariin muhiim ah oo ku saabsan sidii loo soo wargelin lahaa dhacdooyinka handadaadda iyo weerarada galmo doonka

Ardayda Dugsiyada Sarre PPS ee Qaaliga ah.

Munaasabada degmada iyo kuwa qarankuba waxa ay kor u qaadeen iyaga oo siyaadiyey wacyigalinta iyo sidii loo soo sheegi lahaa dhacdooyinka handadaadda galmo doonka ah, rabashada galmo doonka, iyo waliba rabashada shukaansiga da' yartu abuurto. Iyada oo aan ka soo horjeedno dhammaanba inay dhacaan dhacdooyinkani, haddana waxaan rabnaa in aan xaqijino haddii ay kugu dhacday ama aad ka war hayso rabashada galmo doonka ama midab-takoor, waxaad ogaataa in aan rabno in aad soo wargaliso dareenkaas iskuuladeena taasi oo aan kuu ballanqaadeyno sidii aan kaaga caawin lahayn xaqijinta nabadjelyadaada qof ahaaneed sidii ay u sugnaan lahayd.

Haddii uu ku soo waajahay dareeno ku saabsan ama rabashado galmo doon ama midab-takoor, dabcan waxaan kugu dhiirigelineynaa in aad raadsado taageerada qoyskaaga. Sidoo kale, waxaan kugu dhiirigelineynaa in aad arrintaas kala hadasho qof weyn oo aad aaminsan tahay joogana iskuulkaaga, kaasi oo noqon kara la-taliyaha ardayda, macallin, maamulka, ama xubin kale oo ka mid ah shaqaalaha. Anigu waxaan ahay Xidhiidhiyaha Degmada ee Title IX, iyada sidoo kalena aan ahay qof laga heli karo waxyaabo fara badan oo kaa caawin kara arrimahani. Marka aan ogaano walaacyadaasi togan, waxaad ogaataa in ay naga go'an tahay sidii aan kuu caawin lahayn una qaban lahayn wax kasta oo aan ku xaqjiineyno nabadjelyadaada. Waa in aad ogaata warbixino kasta oo aad soo gudbisaa ama qof kale u soo gudbiyo si daacadnimo ku jirto kuma muteysaneysid wax aargudasho ah ama ciqaab ah. Waxaan rabnaa in aad soo gudbiso iyada oo aad heli doonto taageerada aad u baahan tahay taasi oo ah mid aad u qalanto.

Meesha la igala soo xiriirayaan macluumaadkeyga iyo agabyada kale ee aad ka heli kartaa waa kuwan hoos ku qoran:

- Xiriiriyaha Degmada ee Title IX (waxaad ka wici kartaa 503-916-3340 ama email [titleix@pps.net](mailto:titleix@pps.net))
- SARC (Xarunta Agabka Weerarka Galmo doonka) waxaad ka wici kartaa 503-640-5311
- Waxaad wacdaa Safe Oregon ama u dir fariin degdeg ah 844-472-3367 ama email [tip@saferegion.com](mailto:tip@saferegion.com)

Marka la soo wargelinayo, waxaan ku weydiin doonaa in aad na siiso wixii macluumaad ee aad na siin karto, sidaas darteed waxba kaala harimeyno taageeradayada iyada oo iskuulkaagana aan ka dhigi doono meel leh jawi nabagelyo.

Marka la firsho dhawaan dhacdooyinka la soo wargalinayo, waxaa suurtagal ah in aad isweydiineysaan waxa kale ee aan degmo ahaan qabaneyno sidii aan ugu diyaar noqon lahayn sidii looga hadli lahaa noocyada wargalinta. Bishii Ogosto ee aan soo dhaafnay, waxa aan bixinay tababaro kor loogu qaadayo dhammaan hoggaamiyaasha dhismayaasha iskuulada. Tababarkaasi ka dib, iskuul kastaa waxa ay doorteen hoggaamiye shaqadiisu tahay Madaxa Dabagalka Iskuulka. Mid kasta oo ka mid ah Madaxa Dabagalka Iskuulka(SCO) waxa ay qaadanayaan tababar qoto dheer oo kor loogu qaadayo sidii looga hadli lahaa nidaamyada khuseeya rabashada galmo doonka

ama noocyda midab-takoorka ka gadaal hababka u fiican qaran ahaan lagu ilaaliyo. Sidoo kale waxaan kobcineynaa manaahijiteena sidii loo xaqijin lahaa in ay ardayda ogaato wixii hagaagsan iyo sida loo soo wargaliyo dhacdooyinka khatarta ah. Golaheena Waxbarashada ee Dugsiyada Dadweynaha Portland sidoo kale waxa ay dhawaan qabatimeen siyaasada Rabashada Shukaansiga Da' yarta taasi oo lagu kaabayo siyaasadii hore ee kor loogu qaadayey Kor Hortaga Cago-jugleynta ee ka hadlaysay rabashada galmo doonka iyo midab-takoorka, iyada oo aad ka heli kartaan halkani:

- [4.30.070-P Teen Dating Violence/Domestic Violence](#)
- [1.80.020P Non-Discrimination/Anti-Harassment Policy](#)

Iskuuladeena, mid kasta oo idinka mid ahi waxaan idinka rajeyneynaa inaad wax ku barataan iyo jawi bulsheed ka madhan midab-takoor ama rabashada galmo doonka. Fadlan soo wargali dhacdooyin kasta oo ku soo waajaha ama aad ka war hayso sidaa awgeed waan ku gargaareynaa iyada oo ay naga go'an tahay in aan iskuuladeena ka dhigno goobo jawigoodu yahay dhammaan wixii aan ka rajeyneynay inaan kala kulano inay noqdaan meal maalin kastana lagugu caawiyo oo nabadgalyo ah.

Waad mahadsan tiiin,

Elisa Schorr  
[ewinger@pps.net](mailto:ewinger@pps.net)  
Agaasimaha Barnaamijyada Dugsiyada Sarre  
Xiriiryaha Ku-Meel-Gaarka ah ee Title IX